



**Is talaalay.  
Soo qaado taleefankaaga gacanta.  
Bilaw v-safe.**

### **Waa maxay v-safe?**

**V-safe** waxaa weeye agab taleefanka ah oo isticmaala fariimo qoraal ah iyo xog uruurin websayt si loo sameeyo isku ogolaanshaha caafimaadka ee shakhsi ahaaneed kadib marka aad talaalka COVID-19 qaadato. **v-safe**, waxa aad si dhakhso ah ugu sheegi kartaa CDC hadii aad yeelatay saamayn caafimaad daro kale kadib marka aad qaadatay talaalka COVID-19. Iyada oo ku xidhan jawaabahaaga, qof ka socda CDC ayaa kula soo hadli kara si uu xaaladaada ula socdo. Oo **v-safe** ayaa ku xasuusin doonta inaad qaadato talaalka labaad ee COVID-19 hadii aad u baahan tahay.

Ka qayb galkaaga **v-safe** wax wayn ayay kuu taraysaa – waxa ay kaa caawinaysaa in talaalkaaga COVID-19 uu amaan noqdo.

### **Sidee ayaan uga qayb galayaa?**

Marka aad qaadato talaalka COVID-19, waxa aad ku biiraysaa **v-safe** adiga oo isticmaalaya taleefankaaga. Ka qayb galkaagu waa ikhtiyaar oo waxa aad ka bixi kartaa wakhti kasta. Waxa aad fariin ka heli kartaa **v-safe** ilaa 2 habeenimo wakhtiga deegaanka oo xasuusin ah. Si aad uga baxdo, waxa aad kaliya fariin ku dirtaa “STOP” marka **v-safe** ay kuu soo dirto fariinta qoraalka ah. Waxa aad sidoo kale dib u bilaabi kartaa **v-safe** adiga oo fariin soo diraya ah “START.”

### **Mudo intee le'eg ayay soconaysaa gelitaanka v-safe?**

Todobaadka kowaad ee ka danbeeya marka aad qaadato talaalka, **v-safe** waxa ay kuu soo diri doontaa fariin qoraal ah maalin kasta oo lagaaga waraysanayo xaaladaada. Kadibna waxa kusoo gaadhi doonta fariin iska soo waran ah hal mar todobaad ah ilaa 5 todobaad. Su'aalaha **v-safe** ay ku waydiiso waxay qaadanayaan ilaa 5 daqiiqo ka jawaabidoodu. Hadii aad u baahan tahay xadi labaad oo talaalka ah, **v-safe** waxa ay kusiin doonaan nidaamka la socodka 6 todobaad si aad uga waranto waxa aad kala kulantay xadiga labaad ee talaalka. Waxa aad sidoo kale xaaladaada lagaa waraysan doonaa 3, 6 iyo 12 bilood kadib marka aad xadiga ugu danbeeya ee talaalka aad qaadato.

### **Dhamaan macluumaadkayga caafimaadka amaan miyaa?**

Haa. Macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed ee ku jira **v-safe** waa la ilaaliyay oo markaa waa sir oo waa qarsoodi.\*

\* Ilaa inta **v-safe** uu isticmaalo waxa weeye macluumaadka nidaamka ay maamusho CDC, FDA iyo hay'adaha kale ee federalka ah, nidaamyadu waxay leeyihiin talaabooyin amaan oo xadidan oo u dhigta heerka xasaasiyada macluumaadka.



**v-safe**<sup>SM</sup>

kadib eegitaanka  
caafimaadka  
talaalka

Isticmaal taleefankaaga gacan si aad ugu sheegto CDC wixii saamayn caafimaad daro kale ee aad yeelatay kadib marka aad qaadatay talaalka COVID-19. Sidoo kale waad heli doontaa hadii aad u baahan tahay xadi labaad.



Isku duwaan geli taleefankaaga gacanta daaqada [v-safe.cdc.gov](https://v-safe.cdc.gov)

AMA

Waxa aad taleefankaaga kameeradiisa ku jeedisaa koodhkan




## Sida la isku duwaan geliyo ee loo isticmaalo v-safe

Waxa aad u baahan tahay taleefanka gacanta iyo macluumaadka ku saabsan talaalka COVID-19 ee aad qaadatay. Macluumaadka waxaa laga heli karaa kaadhkaaga duwaanka talaalka; hadii aad waydo kaadhkaaga, fadlan waxa aad la xidhiidhaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

### Register

1. Qabo websaytka **v-safe** adiga oo isticmaalaya mid kamid ah labada ikhtiyaar ee hoose:



2. Akhri tilmaamaha. Guji **Get Started**.
3. Geli magacaga, lambarkaaga taleefanka, iyo macluumaadka kale ee lagaa dalbado. Guji **Register**.
4. Waxaa lagu soo diri doonaa fariin qoraal ah oo uu la socdo koodhka xaqiijinta ee taleefankaagu. Geli **v-safe** oo guji **Verify**.
5. Xaga sare ee shaashada, guji **Enter vaccine information**.
6. Dooro talaalka COVID-19 ee aad qaadanayso (waxaana laga heli karaa kaadhkaaga duwaanka talaalka; hadii aad waydo kaadhkaaga, fadlan waxa aad la xidhiidhaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka). Kadibna geli taariikhda lagu talaalay. Guji **Next**.
7. Waxa aad naqdidaa macluumaadka talaalkaaga. Hadii uu sax yahay, guji **Submit**. Hadii kale, guji **Go Back**.
8. **Hambalyo! Waad dhamaysay!** Hadii aad dhamayso is duwaan gelinta wixii ka horeeya 2 habeenimo wakhtiga deegaanka, **v-safe** waxa aad uu bilaabi doonaa in uu xaaladaada caafimaad kaa waraysto 2 habeenimo maalintaas. Hadii aad is duwaan gelisay wixii ka danbeeya 2 habeenimo, **v-safe** waxa uu markaba bilaabi doonaa inuu kaa waraysto xaaladaada caafimaadka isla mar aad sidaa isku duwaan geliso kadib-kaliya raac tilmaamaha.  
Waxaa lagu soo diri doonaa fariin qoraal ah oo xasuusin ah oo la socota v-safe marka ay gaadho marka xiga ee xaaladaada caafimaadka lagaa waraysanayo - ilaa 2 habeenimo wakhtiga deegaanka. Kaliya guji linkiga la socda fariinta qoraalka ah si aad u bilawdo la socodka.

### Dhamee la socdoka caafimaadka v-safe

1. Marka ay kusoo gaadho fariinta qoraalka ah ee la socodka caafimaadka ee **v-safe** oo ay taleefanka kuugu soo dhacdo, waxa aad gujisaa linkiga marka uu diyaarka yahay.
2. Raac tilmaamaha si aad u dhamaystirto la socodka caafimaadka.

### Cilad saar

**Sidee ayaan ugu soo laaban karaa oo aan u dhamaystiri karaa la socodka caafimaadka mar danbe hadii la isaga oo dhax galo?**

- Guji linkiga fariinta qoraalka ah ee xasuusinta ah si aad dib ugu bilawdo oo aad u buuxiso la socodkaaga caafimaadka.

**Sidee ayaan marka danbe u gelinayaa macluumaadkayga talaalka kadib talaalka labaad ee COVID-19 marka aad qaato?**

- **V-safe** ayaa si toos ah kaaga dalban doonta inaad geliso macluumaadka talaalkaaga labaad. Kaliya waxa aad raacdaa tilmaamaha.

**Ma waxa aad u baahan tahay in wax lagaa caawiyo v-safe ah?**

La hadal 800-CDC-INFO (800-232-4636)

TTY 888-232-6348

24 saacadood, 7 maalmood todobaadkii

Booqo [www.cdc.gov/vsafe](https://www.cdc.gov/vsafe)

